

## **Naga caawi Bixinta Qarashkaaga**

Rady Children's Hospital and Health Center waxay ku faraxsan tahay shaqadeeda ah inay daryeel tayo sare leh siiso dhammaan dadka u baahan, ayadoo aan loo eegayn awoodooda dhiibista qarashka.

Haddii aadan haysan caymis caafimaad oo aad ka walwalsan tahay in aanad awoodi doonin inaad dhiibto qarashka daryeelkaaga, waxaa laga yaabaa inaan ku caawin karno. Rady Children's Hospital - San Diego (RCHSD) ayaa caawimaad dhaqaale siisa bukaannada ayadoo lagu saleynaayo dakhligooda iyo baahiyahooda. Anagoo adeegsanayna adeegyadeena talo bixinta dhaqaalaha, waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan kaa caawino celista daboolis caymis ama caymis caafimaad oo qiimo jaban, oo aan kaala shaqeyno diyaarinta qorshaha lacag bixinta la maamuli karo, ama, haddii dakhliga qoyskaagu ka hooseeyo 550% Heerka Fakhriga Federaaliga (Federal Poverty Level, FPL) waxaa laga yaabaa inaad u qalanto inaad codsato Barnaamijkeena Caawimaada Dhaqaalaha (Financial Assistance Program).

### **Sida loo Codsado**

Si aad u hesho macluumaadka dheeraad ah, fadlan kala xiriir Waaxdeena Talo Bixinta Dhaqaalaha (Financial Counseling Department) (858) 966-4005. Saacadaha shaqada waa Isniinta ilaa Jimcada, 7:00 subaxnimo ilaa 11:30 barqanimo, iyo Sabtida iyo Axada 7:00 subaxnimo ilaa 3:30 galabnimo. Waxaan uga jawaabi doonaa su'aalahaaga si sir ah oo xushmad leh.

Waxaad codsan kartaa nuqulka xeerkeena, oo ciwaankiisu yahay HPM 7-11, Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha (Lacagaha Qiimo Dhimista Leh iyo Xeerarka Daryeelka Sirta), oo kaaga imaanaaya Wakiilka Helitaanka Adeegyada ee Bukaanka. Waxaad uga heli kartaa dhammaan xeerarka caawimaada dhaqaalaha qaab oonlayn ah <https://www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance/>.

Tusmada Qeexitaanka Qarashka ee Rady Children's (Charge Description Master, CDM) waa jadwal balaaran oo mideysan oo sheegaaya qarashaadka uu qaado isbitaalku kaasoo ah qarashka guud ee lagu qaado adeeg la baxshay ama badeeco kastoo laga dalban karo bukaan, lacag bixiyaasha ama dhakhtarka kale ee caafimaadka. Rady Children's CDM ayaa ka helayso si aad u akhrido webseedkeena oo ah [www.rchsd.org/patients-visitors/charge-description-master/](http://www.rchsd.org/patients-visitors/charge-description-master/).

Xogta Daraasaadka tayada iyo natiijada isbitaalka ee Waaxda Helitaanka Daryeelka Caafimaadka iyo Xogta ee California (California Department of Health Care Access and Information, HCAI iyo xogta xog uruurinta Gudiga Wadajirka ah ayaa la heli karaa si aad ula akhrido xubin ka socda Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka (Patient Financial Services Department, PFS). Fadlan ka wac Xarunta Adeegga Macaamiisha (Customer Service Center) (858) 966-4912 si aad u codsato balan.

### **Barnaamijka Cabashada Biilka Isbitaalka**

Barnaamijka Cabashada Biilka Isbitaalka (Hospital Bill Complaint Program) waa barnaamij gobalku leeyahay, kaasoo dib u eegaaya go'aannada ku saabsan in aad u qalanto caawimaad ku aadan biilka isbitaalkaaga. Haddii aad aaminsan tahay in si khaldan laguugu diiday caawimaad dhaqaale, waxaad gudbin kartaa cabsho Barnaamijka Cabashada Biilka Isbitaalka ee Gobalka California. Booqo [HospitalBillComplaintProgram.hcai.ca.gov](http://HospitalBillComplaintProgram.hcai.ca.gov) si aad u hesho xog dheeraad ah aad u gudbiso cabasho.

### **Caawimaad Dheeraad ah**

Waxaa sidoo kale jira xarumaha macaamiisha ee maxaliga ah oo la heli karo si ay kaaga caawiyaan fahanka hawsha biilka iyo lacag bixinta, iyo sidoo kale xogta qusaysa kulamada hordhaca ah ee Covered California iyo Medi-cal. Booq Webseedka Health Consumer Alliance, <https://healthconsumer.org>, si aad u hesho xog dheeraad ah aadna u hesho xarunta degmada oo kuu dhow.

Fadlan la xiriir Adeegga Macaamiisha Rady Children's oo aad ka helayso (858) 966-4912 haddii aad u baahan tahay caawimaad ku aadan dib u eegista ogeysiiskan oo qaab kale ah, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna in ogeysiiskan laguugu akhriyo luuqad aad dooratay.

Ogeysiiskan ayaa lagu heli karaa luuqado kale. Booqo webseedka Rady Children's <https://www.rchsd.org/patients-visitors/financial-assistance/>.